

Cutubka 1-aad – Qadashada Shaatiga Darawalnimo

Waxaa jiraa saddex tallaabo oo ay tahay in qofka uu qaado si uu u helo shaatiga darawalnimo oo buuxa.

1. Kow waa iaand ku soo baxdaa Imtixaanka ay sameeyaan dadka Baranayaa sida baabuurka loo kaxeeyo ee doonaayo in ay helaan oggolaansho ay ku kaxeeyan baabuur (kani waa imtixaan qoraal ah)

Learner Permit (Oggolaanshaha Ardayga) u oggolow qofka inuu baabuur wado iyada oo la kormeerayo wayn oo haysta shaatiga darawalnimo da'diisuna ay ka wayn tahay 21 sano jir. Oggolaanshaha Yar ee dhallinyarta da'da yar ee baranayaa sida baabuurta loo kaxeeyo waxey leeyihiin waxyaabo dheeraad ah oo laga mamnuucayo. Waxaa dadkaasi loo soo jeedinayaa inay bar-bartaan sida baabuurka loo kaxeeyo muddo dhan 50 sacadood, iyadoo 15 kamid ah 50-kaas sacadood ay tahay in la barto kaxeeynta baabuurta marka ay qorraxda dhacdo kadib.

2. Qaado oo samee Koorsada 5-ta sac ah ee Ka hor-inta aan qofka la siinin shaatiga (taasi oo aad ku heli karto shahaado aad uu baahan tahay in aad keento marka aad sameyneyso imtixaanka adeegsiga wadada)

Koorsadan waa loo baahan yahay waana in la dhameeyaa kadib marka aad hesho Oggolaanshaha aad ku Baraneyso kaxeeynta baabuurta.

3. Qabso ballan oo samee Imtixaanka Adeegsiga Wadada.

Imtixaanka Adeegsiga Wadada waxey qaadataa muddo 15 daqiiqo ah. Haa ku keeno kormeerahaaga haysta shaatiga darawalnimo ee ay da'diisu ka wayn tahay 21 goobta aad ku sameyneyso imtixaanka adeegsiga wadada. Dukumeentiyada diiwaangelinta iyo caymiska baabuurka waa in ay yihiin kuwo aan dhacsanayn. Keen oggolaanshahaaga iyo shahaadada 5-ta sacadood ee ka hor-inta aaddan shaatiga qaadanin. Qofka ku hagaayaa ayaa ku raaci doonaa xilliga aad kaxeeyneyso baabuurka si uu uga soo waramo oo uu go'aan uga gaaro in darawalka uu kaxeeyn karo baabuurka isagoo aan lala socon. Haddii uu darawalka ku guuleysto imtixaanka adeegsiga wadada, darawalka ayaa kaxeeyn doonaa baabuurka isagoo aan la kormeereynin oo waxaa la siin doonaa shaatigiisa oo buuxa. (Shaatiga Yar ee la siiyo dhallinyarta da'da yar ayaa leh waxyaabo dheeraad ah oo laga mamnuucayo – eeg sharciyada darawalka)

Darawalada ayaa mas'uul ka ah inay kala saaran noocyada kala duwan ee aqoonsiyada iyo waxa ay ku oggolyihiin in aad sameeyso. Waa in awood uu leedahay in aad kala sheegtaa waxa uu dhaxeeya iyadoo tani lagu saleynaayo ereyada ku qoran aqoonsiyada ku qoran Ingiriiska.


ADIGOO HAYSTA KAARKA AQOONSIGA HA KAXEYN BAABUUR – Kaxeeynta baabuur adigoo haysan shaati waxey ka dhigan tahay inaad ku xadgudubtay Shuruucda Gaadiidka iyo Wadooyinka.

HADDII AAD HESHO OGGOLAANSHAH QOFKA BARANAYAA SIDA LOO KAXEYEO BAABUURKA Waxey ka dhigan tahay inaad ku guuleysatay imtixaanka qoraalka ah.

KELIYA KAXEE BAABUUR ADIGOO UU KULA SOCDO QOF KU KORMEERAAYO KAAS OO AH DARAWAL HAYSTO SHAATI OO AY DA'DIISU KA WAYN TAHAY 21 SANO

In keligaa aad baabuur kaxeeyo adigoo haysta oggolaansho ayaa waxey ka dhigan tahay in aad gaysatay Dembi ka dhan ah Shuruucda Gaadiidka iyo Wadooyinka ee Gobolka New York.


HADDII AAD HAYSATO SHAATIGA DARAWALNIMO – DA'DAADUNA AY KA WAYN TAHAY 21 SANO WAAD WADI KARTAA BAABUURKA KELIGAA HADDII AAD KU GUULEYSATO IMTIXAANKA ADEEGSIGA WADADA (Haddii lagugu helo dembiyada qaar ee wadooyinka muddo lix billood ah gudahood kadib markii aad qaadatay shaatiga darawalnimo waxaa ay tani keeni kartaa in meesha laga saaro ama gebi ahaanba lagala noqdo shaatiga darawalnimo in muddo ah.)



Identification Card (Kaarka Aqoonsiga) - ee ka weyn 21



Learner Permit (Oggolaanshaha Ardayga) - ee ka weyn 21



Driver License Over 21 (Shatiga Darawalnimada ee ka weyn 21)

Kaarka Aqoonsiga ee qofka aan Darawalka ahayn ayaa ka cawin karaa inaad xaqiijiso qofka aad tahay amaba waxaa ay ka cawin kartaa in la aqoonsado address-kaaga.
Ma ahan oggolaansho aad ku kaxeeyn karto baabuur.



Haddii aad guurto waa in aad ogeysiisaa Waaxda DMV ee Gobolka New York muddo 10 maalmood gudahood adigoo ku soo dirayaa iimayl Foomka Isbeddelka ku yimid Address-kaaga (MV-232). Waa in address-kaaga cusub aad ku qortaa goobta bannaan ee dhanka dambe ee Aqoonsigaaga, Oggolaanshahaaga ama Shaatigaaga.

Haddii aad leedahay shaati shaqeynayaa ee aad ka qaadatay gobol ama dal kale ama aad deegan tahay gobolkaas amaba wadankaas shaatiga laga siiyay, sharciyan baabuur waad ku kaxeyn kartaa Gobolka New York. (Haddii aad tahay qaxooti aadna haysato shaati aad ka qaadatay dal kale shaatigaasi **ma aha** mid ka shaqeynayaa Gobolka New York. Waa in mar kale aad martaa guud ahaan hannaanka qaadashada shaatiga si aad si sharciyan ah aad baabuur ugu dhex kaxeysa gobolka.)

Haddii shaati laga siiyay gobol kale oo deeganaansho aad ka hesho Gobolka New York, waa in aad shaatiga darawalnimo ka dalbataa Gobolka New York muddo 30 maalmood gudahood kadib markii aad deegaan ku yeelato New York si aad uu sii haysato shaatigaaga darawalnimo ee sharciya ah.

QABSO BALLAN OO SAMEE IMTIXAANKA ADEEGSIGA WADADA:

Qabso ballan oo samee Imtixaanka Adeegsiga Wadada si aad uu hesho Shaatiga Darawalnimo! Waxaad si bilaash ah aad isaga diiwaangelin kartaa khadka <https://roadtest.dmv.ny.gov/Default.asp>

Samee Imtixaankaaga Adeegsiga Wadada. Aad address-ka ku xusan ballantaada. Wakhti hore imow. Waa in aad keentaa oggolaanshahaaga, Shahaadada Koorsada Ka-hor inta aan Shahaadada lagu siinin, waa in uu ku wadaa darawal haysta shaati kaas oo da'diisu ay ka wayn tahay 21 sano. Baabuurku waa in uu ahaadaa mid aan cillad lahayn, iminkanba diiwaangashan, laga baaray cillad lehna caymis.

<p>Haddii aad ku guul dareysato imtixaanka adeegsiga wadada.</p>	<p>Haddii aad ku guuleysato imtixaanka adeegsiga wadada.</p>
<p>Qofka ku hagayaa waxaa uu ku daabici doonaa waxa keenay in aad ku guul dareysato imtixaanka. (Dabacadaasi waxey uu eeg tahay sida rasiidka aad khudaarta ku soo iibsatay)</p> <p>Inta badan dadka imtixaanka wey ka dhacan marka hore ee ay qaadanaayan. Waxaa lagu siin doonaa fursada labaad adigoo wax lacag ah aan laga qadeynin. (Kadib isku dayga labaad waxaad uu baahan doontaa address-ka iimaylka si aad isugu diiwaangeliso waxaana tani kaga bixi doonaa \$10.)</p> <p>Uu keen rasiidka Barnaamijka Badqabka Wadooyinka ee MVRRCR. Waxaanu ka cawin doonaa inaad ogaato waxay ay tahay inaad saxdo.</p> <p>Isku day inaad baabuur wado in badan oo sax waxyaabaha horay aan kugu shaqeynin.</p> <p>Isdiiwaangeli si imtixaanka mar kale aad uu sameysid.</p>	<p>Waxaa lagu siin doonaa shaati ku meel gaar ah kaas oo aad isticmaali kartid ilaa iyo inta shaatiga buuxa iimaylka lagugu soo dirayo.</p> <p>Waxaa lagu siin doonaa muddo 6 billood oo tijaabo ah waxaadna weyn kartaa xaqa aad uu leedahay in aad baabuur kaxeysid haddii aad jebiso shuruucda wadooyinka.</p> <p>Waxaad mas'uul ka tahay inaad uu hoggaansanto dhamaan shuruucda wadooyinka iyo aaladaha.</p> <p>Ogow inaad lumin karto xaqa aad uu leedahay inaad baabuur kaxeysid.</p> <p>Haddii aad hesho tigidhka ganaaxa ee dembiyada dhanka wadooyinka waa in aad qaadaa dhamaan tallaabooyinka lagaga baahan yahay si aad wax uga qabato arrimaha ku xusan tigidhkaas. Inta badan dadka waxey qabsadan qareen si uu u cawiyo.</p>

Ilaa iyo intee ayaan bar-bartaa baabuur aniga oo la ii kormeeraayo ka hor inta aan sameynin imtixaanka adeegsiga wadada?

Haddii aad ka yar tahay 18 sano, inta aaddan sameynin imtixaankaaga adeegsiga wadooyinka waa in aad

- haysataa ugu yaraan 50 sacadood oo ah inaad bar-bartay sida loo kaxeeyo baabuurka iyadoo uu kula socday kormeere
 - adigoo ugu yaraan 15 kamid ah 50-kaas sacadood aad baabuurka kaxeysay xilli habeen ah (kadib markii ay qorraxda dhacdo)
 - ugu yaraan 10 sacadood inaad baabuurka ku kaxeysid xilli ay samxadda tahay inta uu dhaxeysa xoogah wax badan ilaa iyo mashquul aad uu badan.
- la imow goobta aad ku qaadaneyso imtixaanka adeegsiga wadada Shahaadada Kaxeeynta Baabuurta ee laga Kormeeray (MV-262) [3] oo uu buuxiyay waalidkaaga ama qofka mas'uulka ka ah si loo xaqiijiyo inaad qaadatay sacadaha lagaga baahan yahay ee kormeerka in aad bar-bartay kaxeeynta baabuurta (waa in MV-262 aad ku wareejisaa qofka qaadayaa imtixaanka shaatiga lagugu siinaayo wakhti kaste oo aad sameyso imtixaanka adeegsiga wadada)

Waxaan uu soo jeedineynaa **dhamaan darawalada** leh da'da kala duwan inay la yimaadan tababar noocan ah oo intan la'eeg.

Waxaan sidoo kale ku soo jeedineynaa inaad sameysa koorsada waxbarashada darawalnimo amaba aad qaadato casharrada xirfadda darawalnimo.

Waxaa jiraa waxyaabo dheeraad ah oo lagaga baahan yahay si aad uu hesho oggolaanshaha darawalnimo. Eeg Qaado shaatiga darawalnimo [4].

Maxaan bartaa xilliga aan isku diyaarinaayo imtixaankeyga adeegsiga wadada?

- **Isteerinka:** Si habsami leh u wareeji isteerinka haddii aad toos uu kaxeeyneysid baabuurka, leexaneysa amaba gadaal aad uu soo laabaneyso
- **Sheelaraaha:** Si habsami leh oo dhexdhexaad ah uu sheelaree. Ha orodsiinin matoorka amaba ha sababin in uu shaqeyn waayo.
- **Biriiga:** Si tartiib ah uu jooji baabuurka. Billow inaad biriiga qabato ka hor inta aaddan joojin baabuurka si fiican isku hagaaji si aad uga baaqsato in maanta oo dhan aad baabuurka joojiso. Hubi in baabuurkaaga aad joojiso oo keliya dhinaca habboon ee wadada.
- **Farisiyoonaha/Marshada:** Mar kaste hubi in baabuurkaaga uu ku jiro marshaha saxda ah. Haddii aad isticmaaleyso baabuurka tooska ah amaba kan marshada la geliyo si loo kaxeeyo, geli marshaha saxda ah wakhtiga ku habboon adigooon "haleyneynin" marshaha.
- **Xawaaraha:** Uu hoggansanow xawaaraha la xadiday, dabcan, adigoo si ku habboon uu beddelanayaa heerkaaga xawaaraha taasi oo aad uu aaneeyneysa cimilada, wadada, aragga iyo marxaladaha kale ee wadada.
- **Masaafada aad uu jiri karto baabuurka ka horreeya:** Masaafo kugu filan uu jir "oo aad uga baaqsaneysa" ee uu dhaxeeya baabuurkaaga iyo kuwa aad daba socota. Adeegso "xeerka labada il-biriqsi" ee lagu qeexay Sharciyada Darawalka. Hubi inaad masaafo dheer aad uu jirto baabuurta kale marka cimilada ay xun tahay ama aragaaga uu liito.
- **Astaamaha, calamadaha iyo sawirrada wadada.** Ogow micnaha astaamaha, calamadaha iyo sawirrada goobaha buurta ah, oo si joogta ah ugu hoggaansanow.
- **Goobta lagu joogsado:** Haddii loo baahdo inaad joogsato, jooji baabuurkaaga ka hor inta uusan gaarin goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan. Haddii ay jiraan khadadka aad ku istaagi karto amaba goobaha dadka lugeynayaa ay wadada kaga gudbaan, istaag ka hor inta aaddan goobahaasi ka gudbin. Haddii aragga laga xanibo kadib markii aad istaagto gadaasha goobta wadada laga goosho, dhaqaaq ilaa iyo inta aad ka awooddo in si wanaagsan aad uu aragto wadadaada, kadib istaag mar kale haddii aad uu baahato.
- **Xulashada qaybta iyo dhinaca aad wadada uga soconeyso:** Ku waad baabuurkaaga dhinaca wadada ee saxda ah, gaar ahaan marka aad isku diyaarineysa inaad leexato. Haa uu oggolaanin in baabuur kale uu ka maro dhinaca aad uu leexaneysa.
- **Isgaarsiinta:** Uu baaq darawalada iyo dadka lugeynayaa oo ha ogaadan dhanka aad ujeedo. Adeegso leerarkaaga dhinaca baabuurka amaba hoonka si joogta ah uu yeeri wakhtiyada ku habboon.
- **Uu fiirso:** Raadi oo ogow dhibaatooyinka suurtagalka ah amaba halista ay leedahay wadada ee kugu hareereysan – ee ma aha oo keliya inaad fiiriso hortaada, balse sidoo kale waa in aad eegtaa gadashaada iyo labadaada dhinacba. Si joogta ah uu eeg muraayadahaaga, oo sidoo kale eeg dhinacyada dambe ee garbahaaga marka aad beddeleneysa dhinaca wadada aad uga socoto.
- **Filo oo ka fal-celi:** Filo khaladaadka suurtagalka ah ee darawalada kale oo uu diyaargarow in si badqab leh aad isaga ilaalisid khaladaadkooda.

TALLOOYINKA IMTIXAANKA ADEEGSIGA WADOOYINKA

Wakhti hore Imow goobta uu imtixaanka ka dhacayo ugu yaraan 30 daqiiqo ka hor xilliga imtixaanka la qabanaayo
Ka soo hormar wakhtiga lagu qabtay – 30 daqiiqo = Wakhtiga aad imaaneyso _____

Habraacyada Suurtagalka ah ee COVID 19

Baaji amaba dib uu dhig ballantaada haddii aad xanuunsan tahay, aad qabto COVID19, aad dareemeyso qandho, aad leedahay astaamaha COVID19, amaba lagu sheegay in aad is-go'doomiso amaba dadka aad ka fogaato.

Xiro Maaskaro (adiga iyo darawalka kula socdo ee kormeeraha ku ah)

Waxey cabiri doonaan heer kulkaaga marka aad goobta soo gaarto

Waxaad ka jawaabi doontaa su'aalaha sahanka ee ku saabsan xanuunada suurtagalka ah iyo/amaba in uu kugu dhacay COVID19

Waxaa laga raabi doonaa in aad nadiifiso kursiga dhanka rakaabka uu ku fadhiso adigoo ku nadiifinayaa tirtiraha leh kiimikada jermiska disho ka hor inta qofka imitixaanka ka qaadayaa uusan baabuurka gelin.

Xusuusnow – Inaad soo qaadato:

- 1. Oggolaanshaha Shaqeynayaa ee Gobolka New York
- 2. Shahaadada 5-ta Sac Fasallada Ka hor-inta aan shaatiga lagu siinin
- 3. Darawalka Gobolka New York ee da'diisu ay kor uu dhafeyso 21 sano ee haysta shaatigiisa.
- 4. Ka dhig baabuurka uu aahadaba mid diiwaangelintiisa iyo caymiskiisa aysan weli dhicin

Adigoo oggolaansho ka helayaa qofka ku hagayaa uu dhaqaaq dhanka kursiga darawalka.

WAXA UGU HORREEYA EE AAD SAMEYNEYSO WAA IN AAD XIRATO SUUNKA KURSIGAAGA!

Kadib toosi labada muraayad iyo kursigaaga.

Kadib, kici matoorka.

Qofka ka Qaadayaa Imtixaanka Adeegsiga Wadada waxaa laga yaabaa in uu isticmaalo astaamaha gacanta si uu kugu sheego waxa aad sameyneyso.

Akhriso bogga halkan ku lifaaqan ee Tilmaamaha Imtixaanka Adeegsiga Wadada.

Imtixaanka adeegsiga wadada wuxuu qaadanayaa muddo 15 daqiiqo – Dib uu eeg xeerarka Wadada ka hor inta aaddan baabuurka kaxeynin.

- Waa in aad uu hoggaansantaa dhamaan sharciyada xadidayaa heerka xawaaraha iyo aaladaha wadada iyo astaamaha xilliga aad sameyneyso imtixaanka adeegsiga wadada.
Xawaaraha ugu sarreeya ee baabuur lagu wadi karo Utica waa 30 mayl/sacadiiba.
- Waa in si badqab leh aad uu kala wareejisaa baabuurka, oo aad dhinac dhigto baabuur kale. Ha uu DHAWAANIN baabuur kale marka aad sameyneyso xirfadahan.
- Daaro leerka ka hor inta aaddan wadada ka leexan, eeg muraayadaha, eeg dhinacyaha garabkaaga si aad uu eegto goobaha inta badan waxa ka soo socda aan si wanaagsan loo arkin.
- Booska gacmaha waa in ay ahaadan 9:00 iyo 3:00.
(Weligaa gacmaha ha is-dhaafsanin marka aad leexaneyso)

Cutubka 2-aad – Sida Meel loo dhigto Shaatigaaga aad ku kaxeyn karto baabuurta Haddii aad gasho dembi culus ee kamid ah dembiyada ay galaan darawalada baabuurta (saddex buundo ama wax ka badan ayaa laga jaran kara) amaba haddii aad geysato dhowr dembi oo ah kuwo fud-fudud, waxaa lagala laaban karaa xaqa aad uu leedahay in aad baabuur kaxeysid iyadoo shaatigaaga meesha laga saari karo amaba lagala noqon karo.

“In meesha laga saaro” micnaheedu waa in shaatigaaga (ama xaqa aad uu leedahay in baabuur aad kaxeysid) lagala noqday in muddo ah ka hor inta aan dib lagugu soo celinin. Waxaa laga yaabaa in laga qaado lacag ganaax ah marka lagu soo celinaayo shaatiga aad baabuurta ku kaxeyn kartid.

“Kala noqoshada” micnaheedu waa in shaatigaaga (ama xaqa aad uu leedahay in baabuur aad kaxeysid) gebi ahaanba meesha laga saaray oo lagala noqday. Si aad uu hesho shaati cusub oo aad baabuurta ku kaxeyn kartid, waa in aad dib uga codsataa Waaxda Baabuurta (DMV) marka uu dhamaado xilliga ay ku eegtahay wakhtiga meesha uu ka maqan yahay amaba uusan shaqeyneynin shaatigaaga. Waxaa laga yaabaa in lagaga baahdo in aad bixiso lacago dib aad ugu codsan karto shaatiga aad ku kaxeyn karto baabuurta. Codsigaaga waxaa laga yaabaa in gebi ahaanba la iska diido haddii uu diiwaankaaga kaxeeynta baabuurta uu muujinaayo in uu yahay mid xun ama aad diido inaad uu hoogaansanto waxyaabaha ay kaga baahan yihiin DMV.

Waxaa laga yaabaa wakhtiga shaatigaaga kaxeeynta baabuurta uu ka maqan yahay in uu ka dheeraado wakhtiga loo qoondeeyay ee ku xusan dabacaadan.

“Xaqa aad uu leedahay in aad baabuur kaxeysid” micnaheedu waa fursada la siiyay darawalinta baabuurta ee ka soo jeeda gobolka dibeddiisa taas oo uu oggolaaneysa in ay baabuur ku dhex kaxeeyaan Gobolka New York. Waxey sidoo kale ka dhigan tahay oggolaanshaha uu Gobolka New York siiyay qofka aan lahayn shaatiga darawalnimo si uu u helo shaatiga darawalnimo ee uu bixiyo gobolka New York. Xaqa uu qofka uu leeyahay in uu kaxeeyo baabuur ayaa meesha laga saari karaa amaba dib loola noqon karaa si lamid ah sababaha loogala noqon karo shaatiyada darawalinta Gobolka New York. Haddii aad baabuurta kaxeeyso adigoo xaqaaga in aad baabuur kaxeeyso meesha laga saaray amaba lala noqday waxaa lagugu ganaaxi doonaa si lamid ah qofka kaxeeyay baabuur isagoo shaatiyiisa meesha laga saaray amaba lagala noqday.

XEERARKA GAARKA AH EE LOOGU TALAGALAY DARAWALINTA HEYSTA OGGOLAANSHAHA IYO SHAATYADA YAR

(Tusaalaha soo socda kama turjumaayo dhamaan cawaaqiibta suurtagalka ah ee ka dhalan karta)

Oggolaanshaha, shaatiga yar iyo xaqa ayaa:

- “Meesha laga saari doonaa” muddo 60 maalmood ah haddii lagugu helo inaad gaysatay dembiyo culus ee dhanka wadooyinka (3 buundo ama wax ka badan ayaa laga jari karaa) amaba laba dembi oo kale.
- “Lagala noqon karaa” muddo 60 maalmood ah haddii lagugu helo inaad gaysatay dembi culus (3 buundo ama wax ka badan ayaa laga jari karaa), amaba laba dembi oo kale inta lagu guda jiro lixda billood ee ugu horreeya kadib markii aad dib uu heshay shaatigaaga ama xaqa aad uu leedahay in aad baabuur wado kaas oo horay meesha looga saaray amaba lagala noqday.
- “Meesha laga saari doonaa” muddo 120 maalmood ah kadib markii lagugu helo in aad farriin dirtay amaba aad ku xadgudubtay shuruucda la xiriirta isticmaalka telefoonka.
- Ka hor inta aan la sameynin imtixaanka adeegsiga wadada waa in qofka uu oggolaanshaha yar haystaa ugu yaraan lix bilood, marka laga reebo wakhti kaste oo sharciga meesha laga saaray amaba lagala noqday.

WAKHTIGA CUSUB EE QOFKA SI DHOW LOOLA SOCON DOONO (WAKHTIGA LA EEGAAYO DHAQANKA WANAAGSAN EE QOFKA) EE DHAMAAN SHAATIYADA KALE EE CUSUB

Haddii da'adaadu ay tahay 18 sano jir ama wixii ka wayn marka aad ku soo baxdo imtixaanka adeegsiga wadada si aad uu hesho shaatiga darawalnimo, amaba markii aad hesho shaatiga horay lagala noqday, waxaa lagu gelin doonaa wakhti si dhow lagula socon doono (si loo eego in dhaqankaaga uu wanaagsanaaday) kaas oo ah muddo lix bilood.

Inta lagu guda jiro wakhtigan lixda bilood ah ee sida dhow lagula socdo:

Shaatiigaaga kaxeeynta baabuurta ayaa meesha laga saari doonaa muddo 60 maalmood ah – Haddii lagugu helo in baabuurka aad ku waday xawaare sare, si xun aad uu kaxeeyneysay, aad si dhow uu daba socotay baabuurta kale, aad ka qaybgashay tartan dhanka xawaaraha ah amaba aad gaysatay laba dembi oo kale ee dhanka wadooyinka ah inta lagu guda jiray xilligan sida dhow lagula socday.

Shaatiigaaga ayaa lagala noqon doonaa muddo 6 bilood ah haddii lagugu helo inaad ku kacday mid kamid ah dembiyada kor ku xusan amaba laba dembi oo kale oo la xiriira dhaqdhaqaaqaga inta lagu guda jiro xilliga labaad ee sida dhow lagula socdo. Markii xilliga lagu qabtay ee wakhtiga laga noqday ama meesha laga saaray shaatiigaaga uu dhamaado, waxaa lagu gelin doonaa muddo lix bilood oo kale oo ah wakhtiga sida dhow lagula socon doono.

Shaatiigaaga ayaa meesha laga saari doonaa muddo 120 maalmood ah – Haddii lagugu helo in aad ku xadgudubtay sharciyada ka dhanka diridda farriimaha amaba isticmaalka telefoonada.

TIGIDHADA GANAAXA AH EE LA XIRIIRA DEMBIYADA WADOOYINKA WAXEY UU BAAHAN YIHIIN IN JAWAAB DEGDEG AH LAGA BIXIYO

https://search.yahoo.com/search?fr=chr-greentree_ie&ei=suff-8&lic=12&type=523482&p=imag-es,+police+at+a+traffic+stop

- Darawal kaste ee loo jaro tigidhka ganaaxa dembiyada wadooyinka wuu is-difaaci karaa isagoo sidoo kale uu matalaayo qareen.
- Waa wax caadi ah in dadku ay qabsadan qareen.
- Muwaadiniinta aan uu dhalan Mareykanka waxaa laga yaabaa in tani ay kala kulmaan cawaaqiib dhanka socdaalka ah marka laga soo tago dembiyada la xiriira wadooyinka iyo/ ama in lagu helo dembiyo kale. Ka hor inta aaddan aqbalin in aad dharato, qareenkaaga ayaa la tashan karaa qareenka dhanka arrimaha Socdaalka si uu ugala taliyo cawaaqiibta suurtagalka ah ee dhanka socdaalka ah ee ka dhalan karto haddii lagu helo dembiga.
 - Shaatiga kaxeeynta baabuurta ayaa meesha laga saari doonaa wakhti aan cayinnayn haddii aad jawaab ka bixin weydo tigidhka dembiyada la xiriira wadooyinka wakhtiga la oggolyahay, ama haddii aad bixin weydo ganaax (aan ahayn kan tigidhada goobaha baabuurta la dhigto amaba ganaaxyada kale), lacagaha dheeraadka ah, lacagaha cawimaada dhibanaha dembiyada amaba lacagaha soo afjarida shaatiga kaxeeynta baabuurta ee meesha laga saaray.
 - Haddii aad Jawaab ka bixin weydo tigidhka ganaaxa dembiyada la xiriira wadooyinka waxey ku horseedi kartaa in si toos ahba lagugu helo dembiga. Haddii si toos ahba dembiga lagugu helo, shaatiigaaga kaxeeynta baabuurta ayaa meesha laga saari doonaa iyadoo sabab looga dhigi doono inaad bixin weyday lacagaha ganaaxa waana lagu xukumi doonaa.

NIDAAMKA BUNDADA EE DMV (Ee la guddoonsiiyay diiwaanka kaxeeynta baabuurta si looga jaro darawalinta xilli kaste oo ay ku xadgudban sharciyada wadooyinka)

Liiska hoos ku xusan ayaa qeexayaa qiimaha buundooyinka ee dembiyada la xiriira wadooyinka ee laga jaranaayo mar kaste oo aad gaysato xadgudubyada la xiriira isticmaalka wadooyinka.

Dhamaan dembiyada ka dhanka ah Sharciyada Baabuurta iyo Wadooyinka waxey horseedan in ganax laga qaado darawalka marka laga soo tago cunaqabataynta kale ee dheeraadka ah ee la saaraayo shaatiga darawalnimo.

Xadgudub	Buund
In si xun looga horumaro baabuur kale, in si aan badqab lahayn uu u beddesho dhinaca wadada uu uga socdo darawalka, inaad baabuurka ku wado dhinaca bidix ee bartamaha wadada, ama in aad baabuurka ku kaxeeyo dhinaca khaldan ee wadada.	3
Xadgudubka sharciga wadooyinka ee ay qaybta ka tahay astaamaha wadada, astaanta joogso amaba astaanta in qofka uu wadada uu baneeyo darawalinta kale.	3
Inaad xaqa wadada ee ay leeyihiin aad siin weydo darawalinta kale	3
Inaad ku xadgudubto goobta uu wadada ka maro tareenka	5
Inaad isaga tagto goobta uu ka dhacay shil waxyeello loogu gaystay hanti amaba lagu dhaawacay xoolaha guriga lagu xanaaneysto.	3
Xadgudubka dhanka is-xakamaynta badqabka taas oo uu qayb ka yahay qofka ay da'diisu ka hooseyso 16 sano jir.	3
In biriiga uusan si wanaagsan uu shaqeyneynin (marka aad kaxeeyso baabuurka qofka aad uu shaqeyso)	2
Xadgudubyada kale ee la xiriira dhaqdhaqaaqa.	2

Xadgudubk	Buund
Xawaaraha MPH ee aan la qeexin	3
Xawaaraha MPH ee ka badan xadiga la soo qoray: 1 ilaa iyo 10	3
11 ilaa iyo 20	4
21 ilaa iyo 30	6
31 ilaa iyo 40	8
Wixii ka badan 40	11
In si taxadar la'aan ah loo kaxeeyo baabuurka	5
In aad ka horumarto baas dugsi oo la joojiyay	5
In biriigyada aysan ahayn kuwo ku filan	4
In si dhow aad uu daba socota baabuurta kale (oo aadan wax nafaas ah siinin)	4
Isticmaalka telefoonka gacanta amaba aalad elektaroonig ah oo gacanta lagu qaadan karo adigoo wada baabuur	5

Dhowr dembi oo ku xusan diiwaanka darawalka waxey keeni kartaa in meesha laga saaro amaba gebi ahaanba lala noqdo shaatigaaga.

Haddii darawalka uu helo 11 buundo amaba wax ka badan muddo 18 bilood gudahood, darawalka waxaa lagu wargelin doonaa isagoo loo dirayaa iimayl in shaatiga kaxeeynta baabuurta meesha laga saarayo.

“Koorasada ka Hortagga Shilalka Baabuurta.” Haddii darawalinta ay qaatan koorasadan waxey hoos uu dhigi karaan wadarta buundooyinka la siiyo ilaa iyo 4 buundo iyagoo ilaa iyo boqolkiiba 10 keydsan kara lacagaha caymiska ee kaga baxa waxyeelada ay geystaan baabuurta iyo isku dhacyada baabuurta.

SHAATIGA MEESHA SIDA QASABKA AH LOOGA SAARAAYO AMABA GEBI AHAANBA LALA NOQONAAYO (Eeg inta uu dhaxeysa Bogga 23-aad ilaa iyo 24 -aad ee sharciyada Darawalnimo si aad uu hesho macluumaad dhamaystiran)

Shaatiyada darawalinta ama xaqa ay uu leeyihiin inay baabuur kaxeeyan meesha waa laga saari karaa ama gebi ahaan waa lagala noqon karaa iyadoo loo cuskanaayo sababo badan. Tusaalaha uu baahan yahay sharciga ee keeni karaa in shaatiyada meesha laga saaro amaba gebi ahaanba lala noqdo waxaa kamid ah:

- **Dembiyada la xiriira isticmaalka Khamriga iyo Maandooriyaha (Ka eeg macluumaadka dhamaystiran Sidoo kale eeg Cutubka 9-aad: Khamriga iyo Maandooriyaha kale)**
- **Diidmada in laga Baaro Daroogo (Sidoo kale eeg Cutubka 9-aad: Khamriga iyo Maandooriyaha kale)**
- **Darawalinta geystay wax ka Yar 21 dembi wey ka duwan yihiin**
- **Baabuurta oo lagu kaxeeyo xawaare sare iyo Dembiyada Kale**

Shaatiigaaga darawalnimo ayaa gebi ahaanba meesha laga saari doonaa wax dhan ugu yaraan lix billood haddii lagugu helo dembiga ah:

- 3 haddii aad xawaare sare ku kaxeeyo baabuurka iyo/ama aad gaysato khalad yar (dembi) ee ah inaad jebiso shuruucda wadooyinka muddo 18 billood gudahood ah (iyadoo lagu saleynaayo taarikhda dembigaasi aad gaysatay, ee ma aha maalinta dembigaas lagugu helay).
- 3 dembiga muddo saddex sano gudahood ah ee “inaad horumarto baaska dugsiga ee la joojiyay”.
- Hal dembi oo ah “inaad ka tagto goobta aad qof ugu gaysatay dhaawac ama shil sababay geeri.”
- Hal dembi oo ah “inaad ka qayb gashay tartan dhanka xawaaraha ah”. In lagugu helo dembiga labaad ee ka qaybgalka tartanka dhanka xawaaraha ah muddo 12 billood gudahood ah waxaa ay keentaa in gebi ahaanba lagala noqdo shaatiga kaxeeynta baabuurta ugu yaraan hal sano.

Caymis La'aan: Shaatiigaaga darawalnimo ayaa gebi ahaanba lagala **noqonayaa ugu yaraan hal sano** haddii aad kaxeeyo ama aad uu oggolaato qof kale in uu kaxeeyo baabuurkaaga aan lahayn wax caymis ah, amaba haddii DMV ay hesho caddeyn ah in aad ku lug lahayd shil iyadoo uu baabuurkaagu lahayn wax caymis ah. Haddii caymiska baabuurkaagu uu dhacay, waa in aad soo celisaa taarikada baabuurkaaga iyo dukumeentiga muujinayaa in la diwaangeliyay kuwaas oo aad ku wareejin karto xafiiska baabuurka. Haddii baabuurka laga saaro wadada oo aan la kaxeeyni heynin, waa in aad soo celisaa taarikada baabuurkaaga, haddii aad sidaasi sameyn weydo waxaa lagugu soo dallici karaa ganaax amaba waxaa meesha laga saari karaa diiwaangelinta baabuurkaaga iyo/amaba shaatiigaaga darawalnimo.

Wakhti aan cayinnay in meesha laga saaro/Gebi ahaanba lala noqdo: Shaatiigaaga darawalnimo ayaa sidoo kale **wakhti aan cayinnayn meesha laga saari doonaa** haddii aad soo sheegi weydo shil aad adiga ku lug lahayd, aad ku wargeliso DMV in ay lacag kala baxan akoon bangi oo aan jirin, aad diido in aad bixiso masruufka ilmaha, aad bixin weydo canshuuraha ama aad uu hoggaansami weydo amar maxkamadeed oo ka dhashay shil aad ku lug lahayd. Tallaabadan meesha looga saaray darawalnimo ayaa sii shaqeyn doonaa ilaa iyo inta aad ka saxeyso marxaladii keentay in markii horeba meesha laga saaro.

Darawalinta Baabuurta Xamuulka ah: Waa dembi aad uu culus in aad kaxeeyo baaska dugsiga oo ay saaran yihiin hal arday ama wax ka badan adigoo sarqaansan.

LACAGAHA IYO GANAAXA AY DOWLADDA SOO ROGTO

Haddii shaatiigaaga darawalnimo meesha laga saaray muddo cayiman, tusaale 30 ama 90 maalmood, shaatiigaaga dib lagugu ma soo celin doono ilaa iyo inta aad ka bixineyso \$50 oo aaddan dib uu soo ceshan karin taas oo lagu soo afjaraayo tallaabadaas meesha looga saaray shaatiigaaga.

NYS Driving Manual Part 1 (abbreviated) Chapter 2-Keeping License

[Si aad uu hesho nuqulkan oo dhamaystiran booqo <https://dmv.ny.gov/brochure/mv21.pdf>]

Inta badan, haddii shaatigaaga darawalnimo dib loola noqday, ma codsan kartid shaati cusub ilaa iyo inta aad ka bixineyso \$100 oo aaddan dib uu soo ceshan Karin taas oo aad dib ugu codsaneyso shaatigaaga . Lacagtaas lagaga ma baahno inaad bixiso haddii shaatigaaga dib loola noqday iyadoo ay sabab uu ah inaad baabuurkaas kaxeysay isagoo aan lahayn caymis amaba haddii shaatigaaga lagu siiyay adigoo lagugu xiray shuruudo amaba la xadiday isticmaalkiisa. Kadib markii dib loola noqdo shaatigaaga, waa in lacagta ganaaxa ah ee ay dowladda kugu soo rogtay aad siisaa waaxda DMV ka hor inta codsigaaga shaati cusub aan la aqbalin:

- **Haddii baabuur aad kaxeysay adigoo aan lahayn caymis ama aad gasho shil iyadoo baabuurkaaga uusan lahayn wax caymis: waa inaad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$750.**
- **Haddii aad diido in laga baaro daroogo: waa in aad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$500(\$550 haddii aad kaxeeyeyso baabuurta xamuulka ah).**
- **Diidmada in laga baaro daroogo muddo shan sano gudahood ah kadib markii lagala laabtay shaatigaaga iyadoo ay sabab uu tahay arrimaha la xiriira khamriga, daroogada amaba haddii horay lagala laabtay iyadoo sabab uu ah diidmada noocan: waa in aad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$750.**
- **Diidmada ah inaad Aqbasho in aad Gaysatay wax Dembi ah: waa in aad bixisaa ganaax lacageed oo ah \$125 iyo \$100 oo lagu soo afjaraayo tallaabadii meesha looga saaray shaatigaaga.**

QIIMAYNTA WAAJIBAADKA DARAWALKA (lacagaha dheeraadka ah ee lagu soo rogo dembiyada qaar)

Oggolaanshaha la siiyo qofka baranayaa kaxeeynta baabuurka, shaatiga darawalka ama xaqa uu qofka uu leeyahay kaxeeynta baabuurta ayaa meesha laga saari doonaa haddii lacagtan la bixin waayo.

(eeg qaybta nidaamka buundada ee cutubkan)

- **\$250/ sanadkiiba muddo saddex sano ah (lacagtaasi oo wadarteedu tahay \$750)** – haddii lagugu helo Dembiga aadka uu daran ee ah in aad Baabuur kaxeysid Adigoo Sarqaansan (Agg-DWI), inaad Baabuur Kaxeysid iyadoo Maskaxdaada aysan joogin (DWAI), inaad Baabuur Kaxeysid iyadoo Maskaxdaada ay Doorisay Daroogo, DWAI-oo ay la socoto khamri iyo daroogada kale, amaba diidmada inaad gudbiso natiijada baaritaanka daroogada.
- **\$100/sannadkii muddo 3 sano ah (lacagtaasi oo wadarteedu tahay \$300)** - haddii lagugu helo hal dembi ama wax ka badan taas oo noqoneysa 5 buundo muddo 18-billood gudahood.
 - **Iyo \$25/ sannadkii muddo saddex sano ah** ee buundo kaste ee dembi kaste oo dheeraad oo aad sameyso inta lagu guda jiro xilligaas.

INAAD KAXEYSO BAABUUR ADIGOO SHAATIGAAGA MEESHA LAGA SAARAY AMABA GEBI AHAANBA LAGALA NOQDAY WAA XADGUDUB DEMBI AH

- Lacagaha ganaaxa ee qasabka ah ayaa uu dhaxeeya \$200 ilaa iyo \$5,000.
- In xabsiga si qasab ah lagu dhigo ama xilliga si dhow lagula socdo.
- Baabuurkaaga ayaa la qaban karaa amaba waad lumin kartaa.
- Ganaaxa aadka uu daran ayaa lagu soo rogi karaa darawalinta kaxeeya baabuurta iyagoo sarqaansan amaba uu daciifiyay khamriga amaba maandooriye iyagoo sidoo kale shaatiyadooda amaba xaqa ay uu leeyihiin inay baabuur kaxeeyan aysanba shaqeyneynin amaba gebi ahaanba dib loogala noqday iyadoo ay sabab uu tahay dhacdo hore oo lala xiriiriyay inay sababtay khamri ama maandooriye.
- Darawalada 10 jeer ama wax ka badan shaatiyadooda meesha laga saaray iyadoo ay sabab uu tahay in aysan jawaab ka bixin tigidhada ganaaxa dembiyada dhanka wadooyinka amaba in aysan bixin ganaax ayaa sidoo kale lagu soo rogi doonaa ganaax aad uu daran.
- Darawalada 20 jeer ama wax ka badan shaatiyadooda meesha laga saaray iyadoo ay sabab uu tahay in aysan jawaab ka bixin tigidhada ganaaxa dembiyada dhanka wadooyinka amaba in aysan bixin ganaax ayaa waxaa ay wajahaayan in lagu soo oogo dembi, xitaa haddii aysan baabuur wadin xilliga xabsiga loo taxaabaayay.
- Ganaaxa in aad baabuur kaxeysid iyadoo shaatigaaga meesha laga saaray amaba gebi ahaanba lala noqday ayaa waxaa lagu qeexay daabacadda Ka soo qaad Shaatigaaga Waa laga Qaatay (C-12) kaas oo laga heli karo mareegta DMV ee ah dmv.ny.gov.

CUTUBKA 3-AAD: Lahaanshaha Baabuur

Si aad uu hesho macluumaad dhamaystiran eeg Cutubka 3-aad ee DMV ee Sharciyada Kaxeynta baabuurta

Shahaadada LAHAANSHAHA waxey Xaqiijineysaa Qofka leh baabuurka – Ku keydso oo dhigo dukumeentigan meel badqabta oo aan ahayn baabuurkaaga oo ku xareysa goobta aad ku keydsato dukumeentiyadaada kale ee muhiimka ah.



Qaybta hore ee shahaadada lahaanshaha baabuurka waxaa ku qoran xogta baabuurka, qofka leh iyo cidda deynta ku leh baabuurka (lacagta amaahda ah ee lagu leeyahay baabuurka).

Marka aad iibsaneysa baabuur iyo ka hor inta aan lagu gudoonsiin shahaadada lahaanshaha baabuurka eeg qaybta hore ee shahaadada lahaanshaha baabuurka si aad uu ogaato inay jiraan cid lacago amaah ah ku leh baabuurka. Ka codsato qofka ka iibinayaa baabuurka in uu dadka daymaha ku leh uu ka codsado inay soo saaran warqad rasmi ah oo muujineysa in wax lacag ah aan lagu lahayn baabuurka. (Haddii aan lagu siinin wax caddayn ah, lacagtii amaahda ahaydna aan la bixinin, dadka daymaha ku leh baabuurka waxey awood uu leeyihiin inay dib ula wareegaan baabuurka.)

Adiga, ama cidda ka iibineysa baabuurka, waa in dukumeentigan ay uu geeyan DMV si ay uu diiwaangeliyan baabuurka. Kadib markii aad diiwaangeliso, DMV ayaa waxey ku siin doontaa Shahaadada lahaanshaha cusub ee ay ku qoran yihiin macluumaadka ciidda iska leh baabuurka. Shahaadadan lahaanshaha ayaa lagugu soo diri doonaa iimaylkaaga.



Qaybta dambe ee shahaadada lahaanshaha waxaa uu u oggolanayaa milkiilaha baabuurka in uu lahaanshaha baabuurka uu ku wareejiyo qof kale.

Xafiiska la tacaalo arrimaha baabuurka ma oggolan doono shahaadada lahaanshaha baabuurka haddii aan la buuxinin warbixinta muujineysa masaafada baabuurkaas uu jaray ama daaha ka rogeysa cilladaha uu qabo baabuurkaas, ama haddii macluumaadka ku qoran shahaadada lahaanshaha la beddelay, la tirtiray, amaba meesha laga saaray.

Foomka DTF- 802 (Iibinta ama Hadiyeynta Baabuur) Caddeynta inaad Bixisey Canshuurta Iibka



Marka aad baabuur ka iibsato dadka Gobolka New York uu u Diiwaangeliyay inay baabuurta iibiyaa, qofka baabuurka ka iibinayaa ayaa laga raba in uu ka qaado canshuurta iibka.

Haddii aad ka iibsato qof kale haa ku siiyo Warqadda Muujineysa inaad Iibsatay Baabuurka -(DTF-802), foomkan waxaa laga heli karaa DMV. Foomkan ayaa caddeynayaa cadada lacageed ee aad ku iibsatay baabuurka waxaana lagu oganayaa canshuurta iibka ee ay tahay inaad bixiso si aad uu diiwaangashato baabuurka.

Waa in hal dhinac la buuxiyaa oo uu saxiixaa qofka iibsaneysaa.

Dhinaca kale waa in uu buuxiyaa oo uu saxiixaa qofka iibinayaa.

NYS Driving Manual Part 1 (abbreviated) Chapter 3 - Owning a Vehicle

[Si aad uu hesho nuqulkan oo dhamaystiran booqo <https://dmv.ny.gov/brochure/mv21.pdf>]

DIWAANGELINTA, CAYMISKA, iyo OGAANSHAHA CILLADDA UU

BAABUURKA LEEYAHAY Haddii aad tahay milkiilaha baabuur ama qof diiwaangelinayaa baabuurta, amaba aad tahay wade baabuur uu leeyahay amaba ku diiwaangashan magaca qof kale, waa mas'uuliyadaada inaad hubisid in uu diiwaangashan yahay, leeyahay caymis lana ogyahay cilladda uu leeyahay ka hor inta aan baabuurka lagu kaxeeyn wadooyinka dadwaynaha. Shaatiga aad ku wadi karto baabuurka waa lagala laaban karaa amaba meesha ayaa laga saari karaa haddii ay kugu cadaato inaad wax isdaba marisay markii aad diiwaangelineysay, caymiska aad saaraneysay amaba aad ogaaneysay cilladda uu baabuurka leeyahay.

OGAANSHAHA CILLADDA BAABUURKA :

Marka aad iibsato baabuur sanad kaste waa in la ogaado cilladaha uu baabuurkaaga leeyahay oo la beddelaa warqadda kugu dhegan baabuurka ee muujineysa in laga baaray cilladaha uu baabuurkaaga leeyahay. Dukaanka lagu cilad bixiyo baabuurta ee la aqoonsan yahay ayaa ka qaadan doonaa lacag yar si uu u baaro ciladaha uu baabuurkaaga leeyahay oo uu u hubiyo in baabuurkaaga uu yahay mid aan cilad lahayn. Midabada warqadaha baabuurka lagu dhejiyo ee muujinayaa in la baaray cilladaha uu baabuurkaaga leeyahay ayaa isbeddelaa sanad kaste waxaana la beddelaa ka hor inta aysan dhamaan bisha warqadda kugu qoran.

Warqadda muujineysaa in cilladaha uu leeyahay baabuurkaaga la baaray ee hoos ku xusan ayaa muujineysaa in baaritaanka cilladaha baabuurka uu leeyahay ay tahay in dib loo baaro bisha Luulyo ee 2014-ka ka hor inta aysan dhamaan Luulyo 2014-ka.

Warqadda muujineysaa in cilladaha uu leeyahay baabuurkaaga la baaray ee hoos ku xusan ee muujineysaa in baaritaanka cilladaha baabuurka uu leeyahay ay tahay in dib loo baaro bisha Juunyo ee 2015-ka ka hor inta aysan dhamaan Juunyo 2015-ka.



Warqadda muujineysaa in cilladaha uu leeyahay baabuurkaaga la baaray waa in lagu dhejiyaa luuqa muraayada xigta dhanka darawalka ee dhinaca uu dhow meesha ay ku dhegan tahay warqadda muujineysa in baabuurka la diiwaangeliyay.




Fasirraada waxyaabaha DMV ee lagaga baahan yahay ayaa waxaa sameeyay Barnaamijka Badqabka Wadooyinka ee MVRRCR si uu kaga cawiyo in si wanaagsan aad uga gudubto geedi-socodkan. Turjumaada waxaa sameeyay shirkadda **tone**. Isku day ah in lagu siiyo macluumaad sax ayaa la sameeyay waxaana laga yaabaa in macluumaadku ay isbeddelaan iyo/ama in si ka duwan ay uu qaatan xafiisyada DMV. Waxaa shaqadani maalgeliyay Maamulka Qaran ee Badbaadada Wadooyinka oo deeq ka helay Guddiga Guddoomiyaha Gobolka New York ee Badqabka Wadooyinka. Rev. 2016-17

NYS Driving Manual Part 1 (abbreviated) Chapter 3 - Owning a Vehicle

[Si aad uu hesho nuqulkan oo dhamaystiran booqo <https://dmv.ny.gov/brochure/mv21.pdf>]

Diiwaangelinta: Diiwaangelinta waxey uu sahleysaa baabuurka in lagu kaxeeyo wadooyinka dadwaynaha.



Baabuurta waa in laga diiwaangeliyaa DMV, si aad uu diiwaangeliso waa in aad uu keentaa caddeynta in ay leeyihiin caymis islamarkaana la baaray cilladaha ay leeyihiin. Waxaa jiraa lacag laga qaadi doono.

- Dadka baabuurta iibiya inta badan dadka iibsanaaya wey uu diiwaangeliyaan
- Haddii si shaqsiyan ah lagu kala iibsaday baabuurku, waa mas'uuliyadda qofka iibsanaaya in uu ka diiwaangeliyo DMV.
- Caddeynta Lahaanshaha (Shahaadada Lahaanshaha Baabuurka) waa in la keenaa marka la diiwaangelinaayo baabuurka.
- Caddeynta in baabuurka uu leeyahay caymis waa in la keenaa marka la diiwaangelinaayo baabuurka.
- Waxaa lagu siin doonaa taarikada sharciyeysan ee baabuurkaaga marka aad diiwaangashato waana in taarikadaas lagu xiraa qaybta hore iyo dambe ee baabuurka.
- Gasho kaarka diiwaangelinta qaybta sanduuq ahaanta ah ee lagu sameeyay shirka baabuurkaaga.
- Warqadda diiwaangelinta waxaa lagu dhejiyaa muraayadda baabuurka.

Dukumeentiga diiwaangelinta baabuurkaaga wuxuu dhacayaa muddo laba sano ah kadib. Ka cusbooneysiiso dukumeentigan DMV ama barta intarneetka ee DMV muddo uu dhaxeysa 45 ilaa iyo 60 maalmood ka hor inta uusan dhicin.

NYS Driving Manual Part 1 (abbreviated) Chapter 3 - Owning a Vehicle

[Si aad uu hesho nuqulkan oo dhamaystiran booqo <https://dmv.ny.gov/brochure/mv21.pdf>]

Caddeynta in baabuurka uu leeyahay Caymis : Kaarka muujinayaa in baabuurka uu leeyahay Caymis

Lambarka
Shirkadda
Caymiska

Taariikhda uu si
rasmi uu
bilaabanaayo

Taariikhda Xilliga
uu dhacaayo

Lambarka Caymiska

NEW YORK STATE INSURANCE IDENTIFICATION CARD	
888 NYS DMV TEST MUTUAL	Policy Number NYPOLICY12345
Name & Address of Issuer DMV All Lines Agency 6 Empire State Plaza Albany NY 12228	Effective Date 12/11/2000 12:01 a.m. (Not acceptable to obtain registration after 45 days from effective date.) Applicable with respect to the following Motor Vehicle: 2001 Year
An authorized NEW YORK insurer has issued an Owner's Policy of Liability Insurance complying with Article 6 (Motor Vehicle Financial Security Act) of the NEW YORK Vehicle and Traffic Law to:	Expiration Date 12/11/2001 12:01 a.m.
MOTORIST, MICHAEL, M 123 SWAN STREET ALBANY NY 12228	FERRA Make NYDMVIN123456789 Vehicle Identification Number
THIS ID CARD MUST BE CARRIED IN THE INSURED VEHICLE FOR PRODUCTION UPON DEMAND	
WARNING: Any person who issues or produces an ID card knowing that an Owner's Policy of insurance is not in effect may be committing a misdemeanor. In addition, a person who presents an ID card if insurance is not in effect may be committing a misdemeanor.	
The name of the registrant and the name of the insured must coincide.	
REPLACEMENT VEHICLE NOTATION: DMV WILL ONLY PROCESS A VEHICLE CHANGE (RE-REGISTRATION) USING THE REPLACED VEHICLE'S CURRENT REGISTRATION.	

Marka aad iibsaneysyo caymiska baabuurkaaga ee ka xaqab tirayaa waxyeelada soo gaarto hantida iyo dadka kale, wakiilka caymiska ama qofka ka dalaalayaa waxaa uu ku siinayaa laba kaar oo ah kuwa muujinayaa in baabuurkaaga uu leeyahay Caymis

- Mid kamid ah kaararkaas uu dhib DMV ama qofka ka iibinayaa baabuurka si uu kugu diiwaangeliyo baabuurka.
- Midka kalena ku heyso baabuurkaaga. (Boolisku ayaa ku weydiin doonaa kaarkan haddiiba ay ku joojiyaan adigoo baabuurka kaxeynaayo.)

Baabuurta waa in ay lahaadan ugu yaraan caymiska ugu jaban marba haddii uu baabuurku yahay mid la diiwaangeliyay, xitaa haddii uu yahay mid aaddan adigu kaxeynin. (Dadka ayaa sidoo kale iibsadaa caymisyada ka xaqab tira haddii ay shil galaan ama baabuurkooda uu waxyeello soo gaaro si looga kafiyo haddii waxyaabo dheeraad ah ay ku yimaadan).

Ka hor inta uusan caymiskaaga dhicin amaba aan la joojinin waa in taarikada sharciiyeesan ee baabuurkaaga aad dib ugu soo celiso DMV. Hubi in lagu siiyo Rasiidka DMV (FS6T) si aad dib ugu celiso taarikada baabuurkaaga. Haddii aad sidaasi sameyn weydo waxaa laga yaabaa in laga qaado ganaax inta maalin ee ka soo wareegtay inta uusan baabuurkaagu lahayn caymis ama waxaa laga yaabaa in baabuurkaaga lagala noqdo diiwaangelinta. Haddii baabuurkaaga uusan lahayn caymis muddo 90 maalmood ah, marka laga reebo marka aad dib uu soo celisay taarikada baabuurkaaga, shaatigaaga darawalnimo ayaa lagala laaban doonaa.

Cutubka 4-aad Xakamaynta Dhaqdhaqaaqa Baabuurta– Xeerarka Wadada

Astaanta xaglaha casaanka iyo caddaanka ah ee goobta wadooyinka ay isaga soo dhacn waxey ka dhigan tahayxawaaraha aad ku socotay yaree oo isu diyaari inaad istaagto haddii loo baahdo.

Astaanta leh qaabka-leydiga ah waa astaanta xadideysa xawaaraha baabuurta.

Astaanta leh qaabka-dheymanka waa astaanta uga digeysa darawalka khatarta wadada ay leedahay.

Midabada astaamaha digniinta ee muujinayaa khatarta ku soo wajahn darawalka, sida luuq-luuqyada wadada amaba buundada ciriiriga ah ayaa ah ereyada madow ama astaamaha ay ku qoran yihiin boorarka jaalaha ah.

Midabada astaanta ku sheegeysa inta ay ku jirto meesha aad wadada wayn uga leexan kartid ee ay ku qoran yihiin xarfaha cagaarka ah iyo caddaanka ah.

Astaantani wadada  micnaheeda waa inaad gebi ahaanba istaagtaa, oo aad dhaqaaqdaa keliya marka aad uu aragto in badqab ay tahay inaad dhaqaaqdo.

Astaantan  waa digniin inaad ku soo dhowdahay goobta looga gudbo goobta uu maro tareenka.

Waa inaad uu hoggaansantaa booliska marka aad gaarto dhinaca kale ee astaanta ku sheegeysa inaad istaagto, leerka casaanka ah ee kacayaa.

Marka aad uu soo dhawaato goobta wadooyinka ay isaga soo dhacn, leerka wadada ayaa iska beddelaa cagar oo waxaa uu noqdaa jaallo. Tallaabada ugu wanaagsan ee aad qaadeyso ayaa ah in aad diyaargarowdo si aad uu istaagto ka hor inta aaddan gaarin goobta ay wadooyinka isaga soo dhacn.

Waxaa laga yaabaa inaad ka gudubto khad leh laba dhinac oo jaallo ah si aad ugu leexato wado gasha xaafad.

Waxaa laga yaabaa inaad ka gudubto khad leh hal dhinac oo caddaan ah oo ku yaalla wadada wayn haddii marxaladaha dhaqdhaqaaqa baabuurta ay ku saamaxan.

Leerka wadada ee leh falaarta cagaarka ah iyo leerka casaanka ah waxey ka dhigan yihiin inaad baabuurka uu kaxeyn kartid oo keliya dhanka falaarta cagaarka ah.

L eerka jaalaha ah ee kacaya waxey ka dhigan tahay si taxadar leh uu soco.

Goobta wadooyinka ay isaga soo dhacn waxey leedahay astaanta istaag, goobta dadka lugeynayaa ay wadada uga gudbaan, ma lahan khadka istaag. Waa in aad istaagtaa ka hor inta aaddan gaarin goobta dadka lugeynayaa ay wadada uga gudbaan.

Markaad gaarto goobta wadooyinka ay isaga soo dhacn ee kicineysa leerka casaanka ah. Waa in gebi ahaanba aad istaagtaa, oo aad socotaa marka aad uu aragto inay badqab tahay inaad socoto.

Marka wadada uu ku yaallo khadka jaalaha ah iyo khadka jaalaha ee aan isku xiriirsaneyn ee xiga dhankaaga waad socon kartaa haddii aysan jirin baabuur kale ee wadada isticmaaleysa.

Khadka caddaanka ah ee dhinaca midigta geeska ah ee wadada xiga ayaa galaa dhanka xiga garabkaaga bidix. Tani waxey muujineysaa in wadada ciriiri ay sii noqon doonto.

Baasaska dugsiyada iyo baasaska rakaabka ee ay saaran yihiin rakaabka waa in ay istaagan marka ay gaaran dhamaan goobaha tareenada ay ka gudbaan.

Chapter 4 Permit Study Guide - Traffic Control
TS.2016.4.Somali.Permit Study Guide (Rev 2022)

Si tartiib ah uu kaxee baabuurka oo isu diyaari inaad istaagto marka aad uu dhawaato goobta uu tareenka maro ee aan lahayn wax astaamo ah.

Haddii baabuurta socda ay ka hor istaagan inaad dhinaca kale uga gudubto dhowr goob oo uu tareenka maro, waa inaad socotaa oo keliya marka baabuurkaaga uu u gudbi karo dhinaca kale.

Haddii tareen soo socda uu aad kugu dhow yahay amaba uu si xawli ah oo khatar ku keeni karta ku socdo, waa in aaddan ka gudbin halka uu marayo ilaa iyo inta uu ka dhafayo.

Yeysan jirin marxalad kugu qasabta inaad baabuurka ku kaxeeyso agagaarka ama hoosta albaab hoos loo dhigayo amaba kor loo qaadayo marka laga hadlaayo goobta uu tareenka maro.



Governor's Traffic
Safety Committee

Cutubka 5-aad – Goobaha wadooyinka ay isaga soo dhacan iyo halka laga Leexdo – Xeerarka Wadada

Waxaad taagan tahay goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan adigoo sugayaa inaad uu leexato dhanka bidix ee wadada. Waa inaad uu baaqdaa baabuurta ku daba socda oo cagaha baabuurkaaga aad toosisaa.



Qaybta hore ee gacanta bidix iyo gacanta oo dhan ayaa hoos loo dhigaa. Baaqa ay gacantan bixineyso ayaa ka dhigan in darawalka uu qorsheynaayo in uu joogsado.



Gacanta bidix ee darawalka ayaa kor loo qaadaa. Baaqa ay gacantan bixineyso ayaa ka dhigan in darawalka uu qorsheynaayo in uu u leexdo dhanka midig.

Waxaad xaq uu leedahay in wadada-lagu-banneeyo marka aad ku jirto wareega baabuurta.

Marka aad dooneyso inaad uu leexato dhanka midig, baabuurkaaga waa in uu u dhawaada dhanka midig ee wadada.

Waxaad rabtaa in dhanka bidix aad uu leexato marka aad mareyso goobta ay wadooyinka isaga soo dhacan. Leerka ayaa ah cagaar hase yeeshe baabuur aad uu badan ayaa dhinacaaga uu soo socdaa. Waa in aad ku sugtaa bartamaha goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan si aad uu sugto in baabuurta ay yaraadan.

Baabuurta jirta dhanka bidix waa in ay wadada uu banneeyan marka laba baabuur ay soo galaan goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan iyagoo hal mar ka kala imanayaa wadooyin kala duwan.

Waa inaad wadada uu banneeyso baabuurka kugu soo dhow marka aad dhanka bidix uu leexaneyso.

Marka aad soo gaarto goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan ee ay baabuurta kale xireen. Waa in aad ka foogaataa goobta wadooyinka ay isaga soo dhacan ilaa iyo marka ay ku caddaato inaad mari karto.

Haddii adigoo wado marayaa oo baabuur kaxeynayaa aad maqasho dhawaaqa seeri Oo durbadiiba aaddan arkeynin baabuurka degdega ah. Waa inaad baabuurka joojisaa oo aad dhigta dhanka wadada oo aad eegta in baabuurka yeerinayaa seerigaas uu saaran yahay wadadaada.

Waxaad rabtaa inaad uu leexato dhanka midig ee goobta xigta ee wadooyinka ay isaga soo dhacan. Waa inaad bilowdaa inaad isticmaashaa baaqaaga muujinayaa inaad leexan rabto ugu yaraan 100 tallaabo ka hor inta aaddan leexan.

Haddii aad uu leexaneyso dhanka bidix adigoo ka imanayaa wadada baabuurta ay labada dhinac ka socdan gelayana wado baabuurta ay isku dhinac uu wada socdan. Marka aad leexato baabuurkaaga waa in uu ku socdaa dhinaca bidix ee wadada.

Marka aad ku soo dhaceyso wado adigoo ka yimid wado gaar loo leeyahay waa in aad wadada uu banneeyso dadka wadada hareeraheeda ku lugeynayaa iyo baabuurta wadada adeegsanayaa.

Cutubka 6-aad Inaad ka horumarto baabuurta kale – Xeerarka Wadada

Marka baaska dugsiga la joojiyo ha ka horumarin isagoo kicinayaa leerarkiisa casaanka ah.

Waad ka horumari kartaa baabuur kale haddii uu ka xigo dhanka midig uuna sugayo in uu u leexo dhanka bidix.

Haddii uu ku dhaaf baabuur ka dambeeyay. Waa inaad tartiib uu socota oo aadna ku socota wadadaada.

Marka aad rabto inaad dhafto oo aad ka horumarto baabuur kale waa inaad uu baaqdaa oo aad ka horumartaa oo keliya markii ay baqdad tahay inaad sidaasi sameyso.

Guud ahaan, waa inaad ka horumartaa oo keliya baabuurta aad isku dhinaca uu socotin ee ka jira dhanka bidix.

Inaad ka horumarto baabuur ka horreeya kaas oo istaagay si uu fursad uu wadada ugu gudbo uu siiyo qof lugeynayaa mar welibo waa mamnuuc.

Kadib markii aad ka horumarto baabuur waa inaad dib ugu soo laabataa wadada saxda ah marka qaybta hore ee baabuur kale aad ka aragta muraayadaada.

Waxaad baabuur ku kaxeeyneysaa bartamaha wadada aan saxmadda lahayn ee leh saddexda dhinac. Baabuur ayaa bilabayaa in uu ka horumaro isagoo adeegsanayaa dhanka midig. Ficillada darawalkaas waa CADI haddii uusan jirin astaan ka mamnuuceysa in uu sidaasi sameeyo.

Cutubka 7-aad Inaad Baabuurka dhinac dhigato baabuurta kale ee yaalla goobaha baabuurta la dhigto – Xeerarka wadada

Astaanta “lama joogsan karo” ee aad ku arki karto goobaha qaar ayaa ka dhigan inaad joogsan karto goobtaas si ku meel gaar ah si aad uga qaado ama uu dhigto rakaab.

Astaanta “halkan baabuur lama dhigan karo” ee aad ku arki karto goobaha qaar ayaa ka dhigan inaad joogsan karto goobtaas si ku meel gaar ah si aad uga qaado ama uu dhigto rakaab.

Astaanta “lama joogsan karo” ee aad ku arki karto goobaha qaar ayaa ka dhigan in, aaddan sidaasi sameyn karin marka laga soo tago oo keliya marka uu ku joojiyo booliska waxeyna tani ku sahleysaa inaad ka fogaato in khilaaf uu idin dhex maro darawalada kale .

Waxaa laga yaabaa in weliga aaddan baabuur dhigan goobta wadada ay uga gudbaan dadka lugeynayaa.

Bal ka warran haddii wadada ay siman tahay, maxey tahay inaad sameyso marka aad dhameyso in baabuurkaaga aad dhigto goob uu dhaxeysa laba baabuur oo kale toosi cagaha hore ee baabuurkaaga oo meel bannaan oo uu dhaxeysa uu bannee baabuurta kale.

Haddii baabuurka aad dhigatay dhinaca kale ee xiga baabuurka kale, waxaa laga yaabaa in baabuurka aad uga baxdo dhanka kale ee ay baabuurta maraayan adigoo aan wax carqalad ah uu geysaneynin baabuurta kale ee ku soo socda dhinacaaga.

Ka hor inta aaddan ka tagin goobta baabuurta la dhigto ee la siman baabuurta kale waa inaad eegtaa inay jiraan baabuur soo socota adigoo madaxaaga marba dhinac uu wareejinayaa.

Darawalka ayaa laga yaabaa in uu baabuurkiisu dhigto goob loo asteeyay dadka naafada ah haddii uu baabuurku leeyahay taarikada muujineysa in qofka wado uu naafo yahay uuna saaran yahay qofka naafada ah ee ku xusan diiwaanka.

Goobta baabuurta la dhigto ee loo asteeyay dadka naafada ah, darawalka aan naafada ahayn ma dhigan karo baabuurkiisa, kuma joogsan karo mana istaagi karo.

Cutubka 8-aad Darawalnimada Is-difaaca – Tallooyinka Inaad si Badqab leh aad Baabuurka ku kaxeeyso

Astaamaha xawaaraha ugu sarreeya ayaa loo qaabeeyaa si baabuurta ay si habsami leh ugu socdaan.

Marka aad saaran tahay wado wayn oo katirsan Gobolka New York oo aysan ku qornayn xadidka xawaaraha ugu sarreeya ee uu qofka baabuurka ku kaxeyn karo, xawaaraha ugu sarreeya sharciyan ee aad baabuurka ku kaxeyn karto waa 55.

Mid kamid ah xeerarka darawalnimada is-difaaca ayaa ah inaad feejignaato oo indhahaaga marba dhinac ay eegaan.

Xawaaraha badqabka leh ee aad ku kaxeyn karto baabuurkaaga waxey ku xiran tahay cimilada iyo marxaladda wadada.

Suunka kursiga baabuurka ayaa waxaa uu aad waxtar ugu noqon karaa aalad ka ilaaliyo dhaawac marka ay xirtaan rakaabka iyo darawalka mar kaste oo ay baabuurka saaran yihiin.

Marka laga hadlaayo safarrada dha-dheer waxaad hurdo isaga ilaalin kartaa adigoo wakhtiyo aan sidaasi uu kala dheereen joogsanayaa si aad uu nasato.

Cutubka 9-aad Khamriga iyo Maandooriyaha Kale - Tallooyinka in si Badqab leh aad baabuur uu kaxeysid

Khamriga wuxuu saameeyaa dhamaan xirfadaha kaxeeynta baabuurta iyo go'aan qaadashada.

Darogada sida daawada xasaasiyada, xashiiska, iyo daawooyinka hargabka loo laqo (daawo) ayaa sidoo kale sameyn karaa awoodda aad uu leedahay inaad baabuur kaxeeyso.

Markii la isku daro khamri iyo darooga kale oo ay uu dhacan dhiigaaga waxey tani sare uu qaadi kartaa saameynta labadaba ay kugu yeelan karaan.

Qadarka khamrada ee ku jirta dhiigaaga (BAC) ayaa waxaa ay ku xiran tahay miisaanka jirkaaga, inta aad cabto, iyo inta uu dhaxeysa wakhtiyada kala duwan ee aad cabto khamriga.

Shaatigaaga darawalnimo ayaa laga qaadi doonaa haddii aad diido in laga baaro daroogo (haddii ay ahaan lahayd inaad neefsato amaba laga baaro dhiigaaga).

Cawaaqiibta ka dhalan karta inaad baabuur kaxeeyso adigoo khamri soo cabay amaba isticmaalay maandooriye kale ayaa waxaa ay keeni kartaa oo suurtagal ah in xabsiga lagu dhigo, ganaax lacageed oo qasab ah in laga qaado iyo in dib lagala noqdo shaatigaaga darawalnimo. (iyo cawaaqiibta suurtagalka ah ee dhanka socdaalka)

Qaabka keliya ee waxtarka leh ee hoos loogu dhigi karo qadarka khamriga ee ku jira dhiiga (BAC) ayaa ah inaad jirkaaga siiso wakhti uu isaga saaro khamriga.

Inaad khamri cabto oo aad wado baabuur waxey dhibaato aad uu daran ku tahay badqabka wadooyinka.

Darawalka qaadanayaa daawo uusan dhakhtar uu soo qorin waa in uu akhriyaa waxa ku qoran daawada ka hor inta uusan kaxeeynin baabuur.

Khamriga wuxuu saameeyaa awoodda uu qofka uu leeyahay in uu ka soo kabsado oo uu wax mar kale arko kadib markii uu qabto iftiinka baabuurta kale ee ka hor yimaada, wakhtiga uu ka fal-celinaayo, iyo go'aanka uu ka gaaraayo masaafaha.

Cabida kafeega kadib marka aad cabto khamri wax saameyn ah kuma laha qadarka khamriga ee ku jira dhiigaaga.

Cel-celis ahaan, jirka bani'aadamka waxaa uu khamriga isaga saari karaa haddii uu cabo 12 fur oo khamriga fudud muddo hal sac ah gudahood.

Baaritaanka darogada ayaa waxaa lagu ogaadaa qadarka khamriga ee ku jira dhiigaaga.

Qadarka cuntada ee ku jirta caloosha, miisaanka jirka shaqsigu, iyo inta uu dhaxeysa wakhtiyada kala duwan ee uu cabo khamriga ayaa dhamaanba saameeyn ku leh dhibaataada khamriga.



Cutubka 10-aad Marxaladaha Gaarka ah ee Kaxeeynta Baabuurta - Tallooyinka sida Badqabka leh aad ugu Kaxeyn kartid baabuurka

Inaad baabuur ku kaxeeyso wado aan wax saxmad ah lahayn wey ka duwan tahay iyo inaad ku kaxeeyso wadada cadiga ah wey kala duwan tahay maxaa yeellay waa in si degdeg ah aad uu fikirtid oo si aad uu hufan aad ula tacashid baabuurkaaga.

Kaxeeynta baabuurta xilliga habeenka ayaa leh khatarteeda maxaa yeellay masaafada dhulka inaga horreeya ee aan arki karno ayaa ah mid aad uu yar.

Marka laga hadlaayo in xaladaha degdega ah lagu kaxeeyo baabuur, waa in aad fikirtaa ka hor inta aaddan ficil sameynin.

Waxaad ka soo baxday wadada aan saxmadda lahayn oo waxaad bilaabeysaa inaad baabuur ku kaxeeyso wadada cadiga ah. Waa inaad eegtaa sacada cabireysa xawaaraha aad ku socoto si aad baabuurka ugu kaxeeyso xadidka xawaaraha hooseeya.

Baabuurkaaga wuxuu bilaabaa in uu boodboodo marka lagu kaxeeynaayo wado simbiriirax ah. Waa in isteerinka aad uu leexisaa dhanka aad dooneyso in cagaha hore ee baabuurkaaga ay aaddan.

Wadooyinka aan saxmadda lahayn waxey leeyihiin “wadooyin laga galo” (wadooyinka laga fulo) si darawalinta ay uu gaaran xawaaraha ku habboon ka hor inta aysan baabuurta kale la jahaan qaadin.

Marka aad baabuur ku kaxeeyneyso iyadoo ay jirto ceeryaamo xooggan maalinna ay tahay waa in aad darataa leerarka hore ee baabuurka.

Marka aad baabuur kaxeeyneyso xilliga habeenkii, waxaa aad muhiim uu ah in aad baabuurka ku kaxeysid masaafaha iftiinka leerarkaaga hore ay qabanaayan.

Haddii aad dhafto halka aad uga bixi lahayd wadada aan saxmadda lahayn, waa in aad sii socota ilaa iyo inta aad ka gaareyso goobta kale ee xigta ee wadada looga bixi karo oo markaas kadib aad ka baxdaa wadada aan saxmadda lahayn.

Marka aad uu diyaargarowdo in aad ka baxdo wadada aan saxmadda lahayn, waa inaad shidataa leerka aad ugu baaqeyso baabuurta ku daba socotaa 100 tallaabo ka hor inta aaddan gaarin halka aad wadada uga baxeeyso.

Haddii uu taayarka ka qarxo, waxa kugu habboon inaad sameeyso inaad ku dhegto isteerinka, oo tartiib tartiib aad uga kacdo gaaska.

Marka aad isku dayeeyso inaad istaagto adigoo saaran wado simbiriirax ah, tallaabada ugu wanaagsan ee aad qaadi karto ayaa ah inaad ku istaagto biriiga si xawaaraha baabuurkaaga uu ku socdo uu u soo dego.

Cutubka 11-aad Wadaagista Wadada – Tallooyinka Badqabka leh ee Kaxeynta baabuurta

Qofka aragga la' waxaa sharciyan uu xaq uu leeyahay in wadada loo banneeyo marka uu wadada goynaayo isagoo oo uu hor kacayo eey hagayaa, amaba isticmalayaa uul cad amaba mid ka sameysan bir.

Wadaha bayskiilka wuu ka duwan yahay wadaha baabuurka maxaa yeellay loogama baahno in uu caymis soo saarto bayskiilka

Marka laga hadlaayo wado aan lahayn goobaha hareeraheeda ah ee ay dadka ku lugeeyn karaan, dadka lugeeynayaa waa in ay ku socdan dhanka wadada ee ay uga muuqan karaan baabuurta ku soo socota.

Qofka kaxeynayaa bayskiilka waa in uu ogaadaa in bayskiilka uu ku wado dhanka midig ee wadada.

Maxey ka dhigan tahay astaanta “baabuur tartiib uu socda” ee midabkeedu liinta yahay ee lagu xardhay saddex xagle.

Qofka kaxeynayaa bayskiilka waa in uu ogaadaa in dhamaan bayskiilada la adeegsado kadib markii ay qorraxda dhacdo ay lahaadan nalalka hore iyo kuwa guduudka ah ee dambe.

Ma ka bixi rabtaa wadada aad baabuurka ku kaxeyneysa oo ma aragtaa carruur ku dheeleysa meel uu dhow goobta aad joogto haddii ay sidaasi tahay waa in aad tagtaa dabada dambe ee baabuurka si aad uu hubiso in wadada ay cidlo tahay ka hor inta aaddan haddana dhaqaajin baabuurkaaga.